

# KU SOO-DHOWOOW HOYGAAGA



# Faa'iidooyinka wanaagsan ee aad naga heli karto

Ku soo-dhowoow noolasha guryaha la kireysto! Guryaha la kireysto [Hyresrätten] waa nooc guryo aad loo xiseeyo. Waayo waa guryo ku hawl fududaynaayo hawlaha guryaha laga qabto, taasoo ku suurtagelinayso inaad lacagahaaga iyo wakhtigaaga aad hawlo kale ku qabsato. Markii aad aqalka kireysanayso waxaad haysata xuriyad aad kaga guurto, ku beddelato aqal ka wayn ama ka yar adigoo u baahnayn inaad gadato ama iibsato. Hambalyo habka fudud ee lagu noolan karo.



## Maamuleyaasha guryaha xaafadda iyo wargelinta cillada

Maamuleyaasha guryaha xaafadda ayaa mas'uul ka ah horumarinta iyo maamulida xaafadda aad degan tahay. Waxay habsadaan in cillad kasta, ha waynaato ama ha ya-raato wax laga qabto. Waxay isku daba-ridaan farsameyaqaanada Shirkadda Mimer, sida shaqaalaha guryaha, koronto-yaqaanada iyo farsameyaqaanada tubooyinka. Habka ugu fudud ee maamuleyaasha guryaha xaafadda loola xiriiri karo, lagana heli karo caawinaad xiriir la leh hoygaaga waa iyadoo aad adeegsato Wargelinta cillada [Felanmälan]. Markii aad guriga u soo guurto waxaa ballan booqasho soo dhowayn ku qaban doono maamuleha guryaha xaafadda. Waxaad waydiin karta su'aallo xiriir la leh hoygaaga. Warbixin ku saabsan shirkadda guryaha, wargelinta cillada iyo warbixinno kale oo muhim ah waxaad ka heleysa [Mina Sidor] iyo albaabka daarta laga soo galo.




## mimer.nu iyo facebook

Adigoo adeegsanaayo shabakadda internetka Shirkadda mimer.nu iyo Facebook, ayaa la socon karta dhacdoonada xaafadda iyo shirkadda guryaha. Shabakadda internetka Shirkadda mimer.nu waxaad tusaale ahaan ka heleysa warbixin xiriir la leh hoygaaga.

## Wargeyska

Sannadkii afar jeer ayaa wargeyska Shirkadda Mimer ee macaamiis-heeda ugu tala gashay [Hemma Hos] lagu soo diraya. Waxaa ku qoran warbixin ku saabsan dhacdoonada goobaha guryaha Shirkadda Mimer, dhismaha qorsheysan iyo naxeexooyin hoygaaga waxtar u leh.



## Kaarka shirkadda Mimer

Maadaama aad aqal ka kireysato Shirkadda Mimer, waxaa lagu siinayaa kaarka Shirkadda Mimer, kaasoo shirkado badan oo magaalada Västerås ka hawlgala, sicir jaban kaga iibsano karto badeecado badan. Warbixin ku saabsan noocyaha badeecadaha qiimahooda wax laga dhimay, waxaad ka aqrisan karta shabakadda internetka [mimer.nu/mimerkortet](http://mimer.nu/mimerkortet) iyo wargeyska [Hemma Hos].

## Siyaabaha shirkadda loola xiriiro oo tirada badan

**Haddii aad booqato [Mina Sidor]:** Shabakadda internetka [mimer.nu](http://mimer.nu) waxaad geli karta [Mina Sidor], kaddib waxaad heli karta warbixin tiro badan oo xiriir la leh hoygaaga. Waxaad ku dhaqaaqi karta wargelinta cilladda, habsan karta in kirada daahid la'aan la bixiyay, dalban karta Xulashada ikhtiyaariga ah ee loo yaqaanno [Plusval], dalban karta goob baabuurta la dhigto iwm. Haddii aan haysanno e-mailkaaga iyo lambarka moobilkaaga, waxaad heli karta adeeg dhaqsi badan iyo warbixin muhiim ah ee lagu soo diro via e-mail iyo sms.


**Wargelinta cilladda [Felanmälan]:** Markii wax halaabaan una baahan hagaajin, ama u baahan tahay in arrin laga caawinno, waxaad ku dhaqaaqaysaa wargelinta cilladda. Xaaladaas waxaad habeen iyo maalin ba iyo saacad kasta adeegsan karta [Mina Sidor]. Ama waxaad wici karta lambarka 021-39 70 90, isniin-khamiis 8-16 jimce kasta 8-14. Habeenkii iyo maalmaha fasaxa waxaad wici karta heeganka 021-39 70 70.

**Maamuleyaasha guryaha xaafadda [Kvartersvärdarna]:** Arrimaha ku saabsan daarta aad degan tahay ama dayrta gudaha waxaad marka hore kala xiriiri karta maamuleyaasha guryaha xaafadda. Waxaad kala xiriiri karta adigoo adeegsanaayo Wargelinta cilladda. Warbixin ku saabsan maamuleyaasha guryaha xaafadda waxaad ka aqrisan karta [Mina Sidor] iyo i goobaha daarta laga soo galo.


**Xafiiska xaafadda [Områdeskontor]:** Maamuleyaasha guryaha xaafadda waxay ka hawlgalaan xafiiska xaafadda ku yaallo Bäckby, Bartamaha degmada, Pettersberg, Skallberget, Vallby ama Viksäng. Saacadaha xafiiska xaafadda la booqan karo waa isniin-khamiis saacadaha 15-17.

**Xarunta macaamiisha & Qolka bandhigidda [Kundcenter & Showroom]:** Xarunta macaamiisha waxay ka caawini karta arrimaha ku saabsan kireysashada, heshiiska iyo Xulashada ikhtiyaariga ah ee loo yaqaanno [Plusval]. Waxaad mar kasta nagu soo booqan karta Torggatan 4, Sigmatorget Västerås city. Xarunta waxay furan tahay isniin-jimce saacadaha 10-17. Waxaad kaloo wici karta 021-39 70 10 ama e-mail ku soo hagaaji [kundcenter@mimer.nu](mailto:kundcenter@mimer.nu).

Waxaa suurtagal noqon karta in faahfaahinta xiriirka iyo saacadaha wax laga beddelo. Mar kasta ka hubso shabakadda internetka [www.mimer.nu](http://www.mimer.nu)



## Nalaga soco!



# Warbixin muhim ah oo ku saabsan markii aad guriga u soo guurayso ama aad ka guurayso

## Wargelinta guuritaanka iyo beddelaadda adreeska

Qofka guuraayo waa in mar kasta uu lacag la'aan toos u wargeliya Hay'adda Canshuuraha. Hay'adda Canshuuraha waxay kaddib adreeska cusub siinaysa hay'adaha badidooda, shirkadaha iyo ururrada bulshada ee ugu muhimsan. Waxaa dhici karto inaad iskaaga u wargeliso adreeska cusub ururrada, shirkadaha iwm oo adreeskaaga cusub ka helayn Hay'adda Canshuuraha. Adiga ayaa la xiriiri kara ama waxaad adeegsan karta shirkadda [Svensk Adressändring], in warqadaha adreeska cusub lagugu soo gudbiyo, haseyeeshe waa adeeg lacag ah. Ka feker inaad daahid la'aan guuritaanka kahor sameeyso wargelinta guuritaanka iyo adrees-beddelaadda.

## Wareejinta heshiiska korontada iyo taleefanka

Markii aad guri cusub u soo guuraysid, waa inaad gasha heshiiska korontada oona ciribtirta heshiiskii korontada ee guriga aad ka soo guurtay.

Sidaasoo kale waa inaad heshiiskii taleefanka iyo internetka ku soo wareejisa adreeska cusub. Warbixin dheeraad waxaad kala xiriiri kartaa shirkadaha korontada, adeegga taleefonada iyo internetka.

## Kontroolka xaaladda guriga

Mar kasta laba jeer ayaan kontroolna xaaladda guriga aad u guuri doonto. Kan ugu horeeyo waxaa la sameeya kahor intii aadan guriga ka guurin. Kan ku xiga kaddib markii gebi ahaan aad ka guurto guriga. Kaasoo lagu kontroolaayo qaabka aad guriga u nadiifisay. Nooca koowaad waa la sameeya mar kasta. Laakinse kan kontroolka qaabka guriga loo nadiifiyay waxaa la sameeyaa markii Shirkadda Mimer maamulayso kala beddelashada fureyaasha ee aqal-kireysayaasha. Haddii fureha u toos kugu wareejiyo aqal-kireystihii hore kuma dhaqaaqno kontroolka qaabka nadaafadda. Xaaladaas adiga ayaa mas'uul ka ah aqbalida qaabka guriga loo nadiifiyay. Tan kale, kuma talo geli kartid in shirkadda ay nadaafadda ka caawinto haddii aadan ku qanacsanayn qaabka u qofkii guriga ka guuray guriga u nadiifiyay. Sidaas awgeed, waxaa lagula talinayaa in maamulida fure kala beddelashada ay Shirkadda Mimer maamusho.

Kontroolka ka guuritaanka waxaa la sameeya kahor intii aqal-kireysadaha usan guriga ka guurin. Markaas waxaa dhici karto in guriga u yaallo sabaanado, laakinse waxaan firogaar siinna wixii isha aan ku dhufanno. Borotokolka kontroolka waxaa ka heli doonta guriga goorta u soo guurto. Haddii ay jirto cillad aan firogaar siinin, waxaad xaq ku leedahay inaad na xasuusiso markii lagu soo booqanaayo, ee maamuleha guryaha xaafadda ku soo booqanaayo. Xaaladaas waxaa suurtagal noqon karto in dhaqsi wax looga qabto caabashaadaada.





## Quful iyo muftaaxyada

Markii aad guriga u soo guurayso waxaa lagu siinayaa ugu yaraan saddex fureyaal oo original ah, mararka qaarkood xitaa fureyaal kale. Fureyaasha guriga waxaa mar kasta ku shaabadaysan isla lambar. Hubso in lagu siiyay fureyaal leh isla lambar iyo tiradooda ba. Haddii fureyaasha u toos kugu soo wareegiyey aqal-kireysadaha hore, hubso in ay yihiin original oo aysan ahayn kuwa gaar ahaan loo samaystay. Fureyaasha lagu siiyay adiga ayaa mas'uul ka ah. Iyadoo xilli maalin ah haddii fureyaasha ay ka lumaan waxaad la xiriiri karta waaxda wargelinta cilladda. Habeenadii iyo maalmaha fasaxa waxaad wici karta lambarka heeganka ee shirkadda xaafadaada mas'uul ka ah [bevakningsföretag]. Warbixin ku saabsan shirkadaas waxaad ka heleysa [Mina Sidor] iyo goobaha daarta laga soo galo.



## Caymiska guryaha ee shirkadda Mimer

Aqal-kireysteyaasha shirkadda waxay xilliga ay ku nool yihiin guryaha shirkadda, ku qasban yihiin in ay leeyihiin heshiiska caymiska guryaha. Shirkadda Mimer waxay heshiis faa'iido leh la gasha shirkadda caymiska Länsförsäkringar. Heshiiskaas wuxuu aqal-kireysadaha siinayaa fursad u ku helo caymiska guryaha aan qabyo ahayn oo gaar ahaan adiga kugu habboon. Aqal-kireysateyaasha shirkadda badidooda waxay leeyihiin ama adeegsadaan caymiska noocaas ah.



# Markii aqalka aad u soo guurayso

## Internet, taleefonada internetka ku shaqeeya iyo telefishanka

Dhammaan guryaha Shirkadda Mimer waxay ku xiran yihiin shabakada magaalada, oo ah shabakada internetka isku xirta degmada Västerås oo idiil oo dhaqsi badan. Shabakada internetka ee degmada waxaad ka faa'iidaystaan karta haddii aad gasho heshiiska internetka. Shabakadda internetka shirkadda Mälarenergi malarenergi.se, waxaad ka heleysa shirkadaha adeegyada internetka laga iibsado, iyo qiimo jaban iyo baahidaada anfacyaso. Shabakada magaalada waxaa kaloo loo adeegsan karaa taleefanka casriga ee internetka loo maro ee loo yaqaanno [IP-telefoni].



Aqalkireysateyaasha badidooda waxay heshiis la galeen shirkadda ComHem, oo laga daawado kanaaleyaasha telefiihanka ee casriga ah. Haddii aad kanaaleyaasha noocaas ah xiisaynayso ama ay jirto cillada telefiihanka la xiriiir shirkadda ComHem. Kahor intii aadan diishka sateelitka ku rakibin waa inaad ruqsad Shirkadda Mimer waydiisa. Sidaas awgeed, wixii ku saabsan qalabyada diishka kala xiriiir maamuelha guryaha ee xaafadda.

## Xulashada ikhtiyaariga ah ee loo yaqaanno [Plusval] – hoygaaga cusboonisiiso

Dadyoowga badidooda waxay jecel yihiin in ay muqaalka guryahooda wax ka beddelaan, sida wax ka beddelaan xaanshidaha gidaarada lagu qurxiyo, saqafka iyo sabaanada jikada. Waxaa taasi suurtagelin karto Xulashada ikhtiyaariga ah ee loo yaqaanno [Plusval]. Heerka kirada ee Shirkadda Mimer caadi ahaan wuu ka hooseeya kuwa gaar ahaanta loo leeyahay. Taasoo ku suurtagelinayso inaad wax ka beddesho muqaalka gurigaaga oo la qabsiiso qaab adiga aad ka hesho. Xaaladaas waxaad adeegsan karta Xulashada ikhtiyaariga ah ee loo yaqaanno [Plusval], sida waxaad qiimo jaban ku dalban karta in laga beddelo xaanshidaha gidaarada lagu qurxiyo, saqafka iyo sabaanada jikada. Kharashka waxaa muddo 5-8 sano ah kolba inyar ku bixin doontaa kirada.



## Dayactir iyo cusboonisiin

Waxaa kaloo sare u qaadi karta tayada gurigaaga adigoo adeegsada xulashada loo yaqaanno [tillval], tusaale mashiinka maacuunta ama dharka lagu dhaqo. Waxaan kalo heshiis la galnay shirkado qiimo jaban laga helo adeegyo waxtar leh. Shirkadda Mimer waxay mas`uul ka tahay dayactirka goobaha qoyan iyo qalabyada jikada sida qaboojiyeha iwm.



**Ku soo-dhowoow gurigaaga!**  
Waxaanu rajeynaynaa inaad aad ugu hesho guryaheenna.  
Guuritaan fudud ayaan ku rajeynayana!



## Dhibicda safka

Dhibicyadii aad lahayd waa laga ciribtirayaaa markii heshiis aad shirkadda la gasho. Sidaas iyo sida aad dhibco cusub ku hesho awgeed, waa inaad codsi cusub sameeysa. Sidaasoo kale, sannad kasta waa inaad cusboonisiiisa warbixin-shaqsiyeedka.

## Booska baabuurada la dhigto

Kaddib markii heshiiska shirkadda Mimer la gasho, waxaad geli karta [Mina sidor] kaddib isku qori karta safka booska baabuurada la dhigto.

## Kirada!

Kirada waa in horumaris ahaan loo bixiya bil kasta – kahor maalinta caadiga ee bisha ugu dambayso. Habka ugu fudud ee kirada lagu bixiyo waa iyadoo la adeegsado [e-faktura] ama [autogiro]



Xarunta macaamiisha iyo Qolka bandhigidda  
Shirkadda Mimer, Torgatan 4, Västerås | Talefaan: 021-39 70 10  
Warbixin dheeraad iyo saacadaha ay furan yihiin waxaad ka heleysa: [www.mimer.nu](http://www.mimer.nu)

**mimer** 